



Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

(Rev.1)

Warcad oo uu soo saaray Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud Mahiga kuna saabsan doorashada Xasan Sheekh oo loo doortay Madaxweynaha Soomaaliya

Muqdisho, 10ka September 2012 – Maanta dadka Soomaaliyeed waxay horey u qaadeen tallaabo weyn ee waddada nabadda iyo barwaqaqada. Maanta Xildhibaanada Soomaaliyeed waxay – si degan, sharaf leh oo u fiirsasho leh – ku dhammeyeen xilligii ku-meelgaarka, waxayna si buuxda u doorteen Mudane Xasan Sheekh Maxmuud inuu noqdo Maxweynaha Soomaaliya. Habka doorashadu wuxuu ahaa mid ay Soomaalidu leedahay una wada dhantahay. Doorashadu waxay martay laba wareeg oo si hufan oo cad looga daawanayay adduunka oo dhan. Habka doorashu wuxuu mid nabad ah oo habaysan loona qabtay si dimuqraadi ah. haddaba dadka Soomaaliyeed waxay beeniyeen shakigii laga qabay, waxayna farriin adag oo horumar leh u gudbiyeen Afrika iyo dhammaan adduunka intiisa kaleba.

Waxaan soo marnay waddo dheer oo aad u dhib badan si aan u soo gaarno halka aan hadda joogno. Muddo hadda laga joogo hal sanno iyo xoogaa ayaa waxaa hakad galay geeddi-socodka nabadda istaagay. Hay'adihii dowladda oo shaqayn waayay ayaa keentay inay Dowladda Federaalka Ku-Meelgaarka Soomaaliya ay ku dhowaato inay laba u kala qaybsanto. Tan iyo maalmahaas adkaa, waxaa la gaaray horumar aad u ballaaran. Haddaba caawa waxaa Soomaaliya ka dhacday hawshii dimuqraadi ee ugu weynayd muddo 40 sanno ah, kaasoo ku soo gabagaboo bay doorashada Baarlamaan Soomaaliyeed ee cusub, oo ay soo xuleen tiro ballaaran oo ka mid ah odehyaasha dhaqanka, Baarlamaanka ayaa doortay Madaxweynaha Soomaaliya ee cusub oo talada dalka haynaya muddo afar sanno ah. Waxaa taas ka horeysay doorashii Baarlamaanka cusub iyo Golihii Ansaxinta Dastuurka oo ay soo doorteen Odayaasha Dhaqanka Soomaaliyeed. Waxaa dhammaaday xilligii ku-meelgaarka – wixii hadda ka dambeeyana Soomaaliya waa inay xooga saartaa sidii lagu heli lahaa xasillooni, dibuheshiisiin iyo in la dhiso hay'adihii maamulka oo la joogtayn karo, lalana xisaabtabi karo, awoodna u leh inay u adeegaan dadweynaha.

Waxayu bogaadinaynaa dhammaan musharaxiinta, natijada doorashadu waxay doontaba ha ahaatee. Sidoo kale waxaan ugu baaqayaa kuwa guuleystaan inay noqdaan kuwo muujiya sharaf iyo geesinimo, kuwa laga guuleystayna inay si xushmad leh ugu qancaan natijada. Waana inay dhammaantooda ka shaqeeyan horumarinta Soomaaliya si loo



Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

gaaro mustaqbal ifaya. Dadka Soomaaliyeed dhammaantood waa inay ka shaqeeyaan dibuheshiisiin si loo gaaro maslaxadda ummada iyadoo la eegayo marxaladdan taariikhiga ah ee ay Soomaaliya marayso.

Weli waxaa dhiman wax badan oo u baahan in la qabto, haddana dadka Soomaaliyeed waa inay ku faanaan geeddi-socodkan. Wuxaan dadka Soomaaliyeed u dirayaan hambalyo diiran. Waxaaa la jooga waqtii rajo iyo yididiilo leh. Waa cusub ayaa Soomaaliya u billowday.